

Dawladdayda

W/Q: Ibraahin-Hawd Yuusuf

29 Dec 2016

Qof wal oo wacyigiisa siyaasadeed korran yahay wax uu lee yahay dawladnimo mala'awaal ah oo uu jeclaan lahaa in ay bulshadiisu yeelato. Qof wal oo madaxweyne noqdayna kolley wuu lahaan jiray dawladdiisa mala'awaalka ah, kolkii uu fursaddii uu ku rumayn lahaa helayna in uu mala'awaalkiisii rumayn waayay waa isaga iyo ayaandarradiisa, ama isaga iyo kartidarradiisa.

Maanta nimanka madaxnimada innaga doonaya kolley mid waliba wax uu maskaxda ku sitaa dawladdiisa mala'awaalka ah; waa haddii aanay ahayn maanlaawayaal is ka xallinaya oo madaxweyne ayaa la noqdaa uun maqlay. Mana jiraan wax diidaya in ay yihiin maanlaawayaal is ka xallinaya oo madaxweyne ayaa la noqdaa uun maqlay. Kol haddii aynnu og nahay in aanay jirin wax mabaadi ah oo ay haystaan, la ga yaabee in aanay daqiiqad qudha oo noloshooda ah ka fekerin sida ay dadkooda iyo dalkooda la jeclaan lahaayeen ee dawladdoodu u ekaan lahayd. Haddiiba ay wax inoo sheegaan ma aha aragtiyo ay rumaysan yihiin ama fikir ahaan iyo aqoon ahaan maskaxdoodu ka soo shaqaysay, waa se in ay maqleen in haddii aad madaxnimo isu sharraxayso dadka waxaas baan idiin qabanayaa baa la dhahaa. Markaa hadaltirada aanay rumaysnayn ee ay meelahaa ka yidhaahdaan wax qiimi ah ma leh, haba yaraatee. In ay madaxweyne u qooqeen iyo doonistoodaa waxa ay balaayo iyo qabyaalad iyo laaluush ku cabbeeyeen ayuun baynnu innagu og nahay.

Yeelkadoode, aniga dawladdayda aan idin baro, la ga yaabee kuwaa aan sheegay qudhoodu in ay i la jeclaadaan dabadeed i la yeeshaane.

1. Falsafadda ay ku dhisan tahay dawladdaydu

Dawladdayda sideedaba waxaa loo abuuray in ay badbaadiso, ilaaliso, daryeesho, wanaajiso oo horumariso qofka ay dawladda u tahay. Ilaahay qofka wax uu abuuray isaga oo gob ah oo dhammays tiran, sida uu ku sheegay aayadda 70-aad ee suuradda al-Israa iyo aayadda 4-aad ee suuradda wat-Tiin. Sidaa darteed cid wal oo qof masuul ka noqota waxaa ku waajib ah in ay gobannimadaa Rabbaaniga ah u qirsanaato oo u dhawrto, xaalad kasta, meel kasta iyo goor kastaba. Si taa waafaqasan, dawladnimada

cusub ee Yurub ee guulaysatay wax ay ku dhisnayd xilka dawladdu in uu yahay "in tirada u gu badan ee suuragal ah bulshada la geliyo liibaanta u gu badan ee suuragal ah". Xilka dawladdaydu haddaba waa in ay qofkaa gobta ah ilaaliso naftiisa, hantidiisa iyo milgihiisa, iyo in ay is la markaa siiso fursad wal oo uu ku horumarin karo kuna rumayn karo dhammaan riyoooyinkiisa wanwanaagsan ee qof ahaaneed, qoys ahaaneed iyo bulsho ahaaneedba.

2. Maamul wanaagga

Dawladdaydu waa dimuqraaddi ay dadkeedu muddadiiba mar doortaan cidda talada u haynaysa heer tuulo ilaa heer qaran. Wax ay lee dahay hay'ado dawladeed oo ka la madaxbannaan, kuwaas oo mid waliba ta kale ilaaliso, is la markaa mid waliba ku kooban tahay gudashada masuuliyaddeeda. Waxa qudha ee hawl qaran la gu maamulo, loo hoggaansamo, la guna ka la dambeeyaa waa dastuurka dadweynuhu doortay iyo sharciyada golaha sharci dajintu soo saaro. Dastuurkaa iyo sharciyadiisa in la jebiyo, ama in la adeegsado awood liddi ku ah, waa jariimad cigaabteeda leh. Idil ahaan muwaaddiniintu waa ay u siman yihiin sharciga, in loo sinnaan waayaana waa godob cigaabteeda leh.

Khiyaamo qaran ka dib, labada dhagarood ee u gu waaweyn ee qof qaranka xil u hayaa masuuliyaddiisa ku geli karaa waa musuqmaasuq iyo eex. Masuulka ay ku caddaato in uu musuqmaasuq ku kacay, ama hawl qaran laba muwaaddin u gu ka la eexday, u gu horreyn wax uu waayayaa xilkiisa, wax uuna mudanayaa cigaab ku habboon oo sharciga waafaqsan. Wax uu se kale oo qofkaasi si abadi ah u waayi karaa xaq muwaaddinnimo ee ah in uu xil dambe qaranka u qabto, taas oo ku xidhan godobta uu galay heerkeeda. Arrinta kale masuulka qaran godob cigaab leh ku noqon kartaa waa in uu ku kaco fal ama hadal bulshada dareen qabyaaladeed ka dhex abuuraya. Dawladdaydu iyada oo tixgelinaysa duruufaha bulsheed iyo dhaqaale ee maanta la gu jiro, wax ay nacabnimo, akhlaaq hoosaysa iyo saqajaannimo u aragtaa musuqa iyo qabyaaladda siyaasadeed.

3. Arrimaha Bulshada

Dawladdaydu wax ay rumaysan tahay dadweynaheedu in uu yahay bulsho qudha oo wada leh dan qudha, dantaas oo ah qodobka 1-aad. Dawladdaydu dadkeeda u ma aqoonsana isdiiddooyin qabiileed, diineed, dhaqaale, siyaasadeed ama dhuleed, wax ay

se u aragtaa arrimahaas oo dhami in ay yihiin wax qudha oo midaysan, si wal oo loo moodo in ay ka la duwan yihiin. Wax ayna dawladdaydu qirsan tahay dadku haddii ay helaan dawlad ku caawisa, in ay lee yihiin awood garasho iyo akhlaaqeed oo u suuragelin kara in ay aragtiyahooda iyo danahooda qofafeed iyo kooxaysi u gu wada noolaan karaan nabad iyo is oggolaansho. Dawladda xilkeedu waa in ay dhaqankaa san bulshada barto kuna barbaariso.

Dawladdaydu wax ay xarrimaysaa ka la sarrayn kasta oo ku dhisan qiimiga qofnimada ama qolannimada, waayo abuur ahaan ma jiro qof dhasha isaga oo qof kale ka hooseeya ama ka sarreeya. Dawladdaydu wax ay xoog iyo xeeladba ku burburinaysaa qoqobyada faquuqa, takoorka iyo qabyaaladda ee dadkeeda ka la qaybiya. Si taa la mid ah ma oggola in diinta la geliyo ama loo adeegsado ujeedooyin shar iyo dhiillo bulshada ka la geynayan, ama in la soo hoos geliyo dano shisheeye.

4. Dhaqaalaha

Dawladdaydu wax ay aad u dhiirrigelinaysaa waxsoosaarka dhaqaale, sidaa darteed wax ay si deeqsinnimo leh u taageeraysaa dadka wax beera, wax dhaqa, waxna dhisa ama waaxsoosaar kale oo waxtar leh hindisa. Wax ay fududaynaysaa dalka in la keeno qalabka iyo aqoonta casriga ah ee la gu tayeeyo la guna horumariyo beeraha, xoolaha iyo kalluunka. Taa beddelkeeda, dawladdaydu wax ay joojinaysaa wax wal oo debedda la ga soo dhoofiyo ama dalka la ga soo saaro oo ay u aragto in aanay waxtar lahayn amaba waxyeello u lee yihiin dadka iyo dalka. La ma keeni karo wax tartan xun ku noqon kara ama curyaamin kara wax la jaad ah oo dalka ka soo baxa.

Dawladdaydu dawarsiga shisheeyaha wax ay ku beddelaysaa xeelad wal oo la gu soo jiidan karo maalgashiga shisheeyaha, wax ayna dalka ka abuuraysaa jawi siyaasadeed oo soo jiita soona dhiirrigeliya hantiilaha dunida. Dawladdaydu wax ay caalamiyaynaysaa dekedaha dalka, kuwaas oo ku yaalla dhul u barakaysan isu socodka dunida iyo ganacsiga.

Dalka dhulkiisa oo dhan waxaa leh dawladda, qofkuna gaar u ma sheegan karo, ma dhisan karo, ma seeran karo, cid kalena ka ma ceshan karo bogcad ka badan inta ay dawladdu u sharciyayso si uu u manaafacaadsado. Dhulkaa dawladdu qofka wax ay ka la soo noqon kartaa goor kasta oo ay danteeda noqoto, ama haddii qofku dhulkaa u gu dhaqmo si ka leexsan sidii loo sharciyeeyay. Sidaa darteed dhaqanka seeraha iyo dhulgoosiga ah ee maanta dalkeenna soo galay ma jirayo.

Dawladdaydu wax ay xarrimaysaa in qof muwaaddin ahi harraad ama gaajo u silco. Iyada oo la ga duulayo qodobka kowaad ee falsafadda dawladdu ku dhisan tahay, jiritaankeedu waa baaddil dawlad dadkeedu ku hoos harraadayo oo gaajoonayo. Dhibaatan xallinteedu ku ma xidhna hodannimo dhaqaale oo dal haysto, waayo dawlad ay dad garaad iyo akhlaaq hagaagsan lihi ka taliyaan, sabool kasta oo ay tahay, haddii aanay maamul xumayn oo musuqmaasuq diloona, ma awoodi waydo dadkeeda, oo weliba tiro yar, in ay ka badbaadiso harraad iyo gaajo. Hanti yar oo qof masuul ahi musuqmaasuqay, ama dhawr baabuur oo qaali ah oo ay qoysas madax ahi ku tamashleeyaan, ayaa ku filan maalgelinta kumannaan iyo kumannaan qoys oo danyar ah si aanay weligood u harraadin una gaajoon. Run ahaantii dalkeenna oo aan boob dawladeed iyo maamulxumo ka jirin la gu ma harraadi karo la gu mana gaajoon karo. Harraadka iyo gaajadu qofka dadnimada ayay ka saaraan, mana yeelan karo tayo iyo kaalin bulsheed oo hagaagsan, sidaa darteed ma jirto meel dawladnimo la ga bilaabo oo ka hoosaysa labadaa masiibo in muwaaddinka la ga ilaaliyo.

5. Waxbarashada

Dawladdaydu wax ay rumaysan tahay guud ahaan waxbarashadu in ay tahay tiir ka mid ah tiirarka mabaadida u ah dhawrista iyo korinta karaamada qofka. Sidaa darteed muwaaddin kastaa wax uu xaq buuxa u lee yahay waxbarasho. Dawladdaydu wax ay kale oo rumaysan tahay tacliintu sideedaba in ay lee dahay laba waji. Ka hore waa in qofku ku helo aqoon iyo xirfad uu ku shaqaysto oo noloshiisa ku maareeyo. Wajiga kalena waa kobcinta iyo tayaynta qofnimadiisa iyo wacyigiisa, taas oo wax weyn u taraysa ahaanshihiisa iyo haddana in uu noqdo muwaaddin suuban. Dawladdaydu wax ay awoodda u gu badan saaraysaa in ay dalka ka dhaqangeliso waxbarasho jihaysan oo mar walba la xoojiyo culuunta dalka loo baahan yahay. Wax ay aad u dhiirrigelinaysaa barashada farsamada gacanta, jaad ay ahaataba, gaar ahaan farsamada casriga ah, iyo xirfad wal oo qofka bartaa shaqo ku heli karo ama ku abuurin karo. Wax ay kale oo dawladdu xoojinaysaa barashada daryeelka iyo caafimaadka, culuunta beerashada, kalluumaysiga, xoolo dhaqasho casriyaysan, iyo culuunta goolajiyada.

6. Dhaqanka

Dawladdaydu dhaqanka wax ay u aragtaa ahaanshaha dadnimo iyo ruuxda bulsho waliba ku nooshahay, la'aantiina dadku ka ma duwanaado xoolaha. Sidaa darteed wax

ay xoog badan saaraysaa dib u cusboonaynta dhaqanka soomaaliyeed, dhinacyadiisa badan. Afku waa astaanta kowaad ee jiritaan dhaqan gaar ah, wax uuna sidaa oo ku dhaansan waxa ay dadkaasi yihiin oo dhan. Haddaba dawladdaydu xoojinta iyo cusboonaynta dhaqanka wax ay kaalinta kowaad siinaysaa xoojinta Af Soomaaliga iyo waxa uu wato ee leh hidde, suugaan, aqoon iyo fikir. Afku wax uu noqon doonaa maaddo meel sarraysa ku leh waxbarashada, warbaahinta, socodsiinta hawlaha qaranka iyo guud ahaan nolol maalmeedda.

Waa dembi cigaab ganaax la gu mutaysto in sabab la'aan dalka loo ga adeegsado af qalaad meel ay ahayd in la adeegsado Af Soomaali. Waxaa reebban in magacyada meheradaha, hay'adaha, ururrada iyo goobaha la midka ah la gu qoro af aan ahayn Soomaali. Masuulka isaga oo xil qaran haya dad Af Soomaaliga yaqaan ku la hadla af kale, ama isaga oo dadkiisa la hadlaya adeegsada erayo iyo weedho badan oo qalaad oo aan loo baahnayn, waa dembi la gu mutaysan karo ganaax, oo xitaa shaqada la gu waayi karo. Xoojinta afka dawladdaydu wax ay u samaynaysaa abaalmarin sannadle ah oo la siinayo qofka keena halabuur iyo hawl afeed loo aqoonsaday in ay qurxisay afka iyo adeegsigiisa ama aqoonbaadhistiisa.

Si taa hore la mid ah, dawladdaydu fanka iyo fannaanka wax ay siinaysaa dhiirrigelin, maalgelin iyo abaalmarin sannadle ah. Dawladdaydu wax ay soo noolaynaysaa ciyaardhaqameeddii soomaaliyeed oo dhan, taas oo ka mid noqonaysa maaddooyinka la gu barto dugsiyada, heer qof wal oo bulshada ahi ciyaari karo. Taasi wax ay dib u soo noolayn doontaa caways dhaqameedkii soomaalida, wax ayna joojin doontaa cawayska reer Galbeed ee ina qabsaday.

Ciddii dawladdayda talo wanaajin ah ku darsanaysa waan soo dhowaynayaa, waa se in ay ahaataa aragti waafaqsan mabaadidaa asaasiga ah ee kor ku xusan.